



Abrile 8, 2020

*Qoysaska Qaaliga ah ee Dugsiyada Dadweynaha Portland,*

*Waxaan warqadaan u qorayaa inaan idinku sheego iyadoo uu gudoomiyaha waxbarashada ee Gobolka maine Pender Makin uu ku taliyay shalay In iskuuladu Xirnaan doonaan inta Sanadka ka hartay ayna sii socon doonto waxbarashada onlineka ku baxda oo la sii wadi doono taasi oo ay ku raacday Gudoomiya Gobolka. Waxaana ay taasi ku saleysantahay hogaaminta Xarunta Xakameynta Cudurada ee U S{CDC} ay baxisay oo ah in 8 ilaa 20 aan la ogolaan isku taga koox aad u balaaran taasi oo ay dhici karto incudurka COVID-19 laysugu gudbiyo..*

*Kani waa go'aan nagu adag anaga Waxaan ogsoonahay dhibka ay Jaaliyadeena Dugsiyada dadweynaha Portland ay ku hayso sii wadida waxbarashada online-ka ku baxaysa. Tani macnaheedu waxaa weeyaan sii socodka la qabsashada inaad ilmahii xanaadooda iyo waliba waxbarashadii Online-ka iyo waliba dhibka dhaqaale aad dhamaantiin la wada xaaleysaan Si kastaba ha ahaatee Muhiimada waxaa weeyaanWewelka inaga haya Badqabka qof kasta oo ka tirsan Bulshada Dugsiyada Portland.*

*Waxaan ka shaqeeynaynaa qorshayaal ku saabsan Buundooyinka oo ay ku jiraan qalinjabinta habkii ay u dhaci lahayd dhamaadka sanad Dugsiyeedka. Waanu idinla soo xariiri doonaa qof walba ka hor intaanaan u baxin fasaxa Gu'ga oo bilaaban doonaa Jimcaha Abrile 17.. Waxaanu qaadan doonaa fasaxii gu'ga si qof kasta oo naga mida qoysaskeena shaqalaha iyo Ardadaba ay uga nastaan waxbarashadaan online-ka. Kolkaas waxaynu iskugu soo noqon doonaa ilaa iyo xiritaanka iskuulka..*

*Inkastoo aysan jiri doonin Fasalo ama Kalaasyo inta lagu jiro fasaxa waxaa sii socon doona Ardada cuntada ay heli ka qaadan jireen Sagaalka goobood maalin kasta oo maalin shaqo ah ka bilaabato saacada 10-12 maalin kasta*

*Markaan bilaabaynay Sanad dugsiyeedka 2019-2020 qof ku farayay ma jirin sanad dugsiyeedka sidaan buu ku dhamaan doonaa in qofba qofka kale ka fogaado iyo inay waxbarashadii isku badasho mid lagu sameeyo Online-ka. Waxaan sii wadi doonaa inaan aad ugu faano sida qof walba oo ka mid ah Shaqaalaha dugsiyada dadweynaha Portland, qoysaska, Ardada uu sidii ugu wanaagsaneyd ka sameynayo kaliya maahan waxbarashada online-ka ee inay noqotay howsheena mid lagu guuleystay run ahaantii. Aad baad u mahadsantahiin kuligiin.*

*Fadlan sii wada inuu qofba qofka kale ka fogaado iyo inaad badbaado ku jogtaan. Mar kale Ayaan idinla soo xariiri doonaa.,*

*Diyaariye*

*Xavier Botana Superintendent*